

# Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xaaladda koroonada ee Andøy

Badhtamihii ogost ayaa dadkii ugu horeeyey ee degmada Andøy laga helay koroonada. Waxannu si dhow ula soconaa xaaladda. Andøy waxay haystaa shaqaale caafimaad oo karti leh oo la socon doona dadka qaaday fayrasta. Wax dhib ah ma leh in carruurta aadaan iskuulka iyo xannaanooyinka.

Si fudud ayey fayrustu u faaftaa. Waxa la qaadi karaa marka qof kugu qufaco ama hindhiso, ama haddii aad taabato meel uu taabtay qof laga helay fayrasta. Taas darteed waxa muhiim ah in qof kasta sameeyo arrimahan si looga hortago faafitaanka:



- In gacmaha si fiican loo dhaqo marar badan.



- Laga fogaado dadka kale.
  - Ku dhaqanka xeerarka ku saabsan karantiimada iyo gooni-u-baxa.
  - In dibedda loo bixin haddii haddii la xanuunsanayo. Yaan lagu soo booqan, cid ha booqan, ha aadin dukaanka, ha aadin shaqo ama iskuul.

## Wac telefoonka koroonada

Haddii aad qabto su'aalo ama aad tuhunsantahay inaad qaaday fayrasta, waxa haboon inaad wacdo telefoonka koroonada. Calaamadu waxay noqon karaan qandho, qufac, culays ku yimaada neefsashada, dareennada dhadhanka iyo urta oo kaa taga, cunaha oo ku xanuuna ama inaad dareensantahay inaad xanuunsanaysa.

Lambarka telefoonka koroonadu waa **941 79 513**.

Waxa uu furanyahay isniin ilaa jimce, wakhtiga u dhexeeya saacadaha 9 iyo 12.



## Karantiimo iyo gooni-u-bax

Haddii lagaa rabo inaad gasho karantiimo ama gooni-u-bax, waxa muhiim ah inaad ku dhaqanto xeerarka:

- **Dadka laga helay koroonada**, waa inay si buuxda uga dhex baxaan dadka kale. Xataa dadka aad la degantahay guriga. Ma u bixi kartid dibedda, waxa haboon inaad joogto qol kuu gaar ah, ku cuntayso qolka iyo inaad tuwaalka/shukumaanka la wadaagin dadka kale.
- **Dadka ay dhici karto inay qaadeen fayrasta**, waa inay galaan karantiimo. Karantiimo ayaa la galaa xataa marka Norway la soo galo iyadoo laga yimi waddamada qaarkood. Waa inaad joogto guriga, mana aadi kartid iskuul, shaqo ama hawlo kale. Keligaa ayaad socod ku mari kartaa dibedda.

## Macluumaad kale

Ku qoran af-noorweyji oo ku saabsan Andøy:

[www.andoy.kommune.no/korona-info/](http://www.andoy.kommune.no/korona-info/)

Afaf kale:

[www.facebook.com/andoy.kommune](https://www.facebook.com/andoy.kommune)

[www.imdi.no/nyttige-nettsider-pa-andre-sprak/](http://www.imdi.no/nyttige-nettsider-pa-andre-sprak/)

**Waad ku mahadsantahay ka qaybgalka hawlwadaagga!**

Salaan wacan Andøy kommune



**Andøy kommune**